



WASAARADDA AMNIGA GUDAHA

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

WARSIDAHA BISHA

SEPTEMBER 2026






HORUDHAC

Intii lagu jiray Sebtembar 2026, Wasaaradda Amniga Gudaha ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya waxay xoogga saartay xoojinta maamulka, isku-duwidda iyo awoodda hay'adaha amniga gudaha. Waxaa si gaar ah loo dardargeliyay hirgelinta natiijooyinkii Shirweynihii Qaran ee Maamulka iyo Isku-duwidda Amniga Gudaha, kaas oo diiradda lagu saaray korjoogteynta hay'adaha, isku-duwidda hawlaha amniga iyo dhisidda hay'ado amni oo waara.

Wasaaraddu waxay sidoo kale xoojisay iskaashiga amni ee heer qaran iyo heer caalami, iyadoo ka qaybqaadatay kulamo iyo shirar looga hadlay xoojinta hay'adaha amniga, la-dagaallanka argagixisada iyo dambiyada abaabulan, amniga xuduudaha iyo dambiyada internetka.

Dhanka kale, waxaa mudnaan la siiyay horumarinta waxqabadka hay'adaha, isla-xisaabtanka iyo adeegsiga tiknoolajiyadda casriga ah, iyadoo la xoojinayo wada-shaqeynta Dowladda Federaalka iyo Dowlad-goboleedyada.

Guud ahaan, waxqabadka Wasaaradda intii lagu jiray Sebtembar 2026 wuxuu muujinayaa dadaal joogto ah oo lagu xoojinayo hay'adaha amniga, isku-duwidda hawlaha amniga iyo iskaashiga gudaha iyo dibadda, si loo gaaro amni gudaha oo wax-ku-ool ah, waara, isla markaana ku dhisan isla-xisaabtan iyo wada-shaqeyn.





Wasaaradda Amniga Gudaha oo Abaalmarisay Howlwadeennadii Shirweynihii Qaran ee Maamulka iyo Isku-duwidda Amniga Gudaha



Muqdisho, 23 Sebtembar 2026: Wasaaradda Amniga Gudaha ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya ayaa magaalada Muqdisho ku qabatay munaasabad Casho-sharaf ah oo lagu maamuusay howlwadeennadii, hay'adihii iyo dhammaan intii ka qaybqaadatay qabanqaabada iyo qabsoomidda Shirweynihii Qaran ee Maamulka iyo Isku-duwidda Amniga Gudaha, kaas oo 1–2 Sebtembar 2026 lagu qabtay magaalada Muqdisho.


Munaasabadda waxaa ka qaybgalay Guddoomiye Ku-xigeenka Guddiga Amniga iyo Arrimaha Gudaha ee Golaha Shacabka, Xildhibaan Nuur Axmed Diiriye; xubno ka tirsan guddiyada labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya; Agaasimaha Guud; agaasime-waaxeedyada, shaqaalaha Wasaaradda, Xafiiska Amniga Qaranka, Saraakiil ka socotay hay'addaha amniga gudaha iyo marti-sharaf kale.

Wasiirka Amniga Gudaha, Mudane Cabdullaahi Sheekh Ismaaciil (Fartaag), ayaa bogaadiyay dadaalka iyo shaqada adag ee ay howlwadeennada Wasaaraddu geliyeen qabsoomidda Shirweynaha. Wuxuu sidoo kale u mahadceliyay hay'adihii iyo shirkadihii taageeray, gaar ahaan Shirkadda Aleel Communications, oo door muhiim ah ka qaadatay dhinaca Warbaahinta iyo tebinta Shirweynaha. Wasiirku wuxuu xusay in wada-shaqeyntu ay laf-dhabar u ahayd guusha Shirweynaha asagoo si gaar ah ugu mahadceliyay dadaalka iyo hawl-karnimada Agaasimaha Guud ee Wasaaradda kaasoo wax weyn ku soo kordhiyay waxqabadka Wasaaradda isla markaana suurto geliyay qabsoomida shirweynaha Qaran.

Ugu dambayn, Wasiirka iyo madaxda kale ayaa Shahaadooyin mahadcelin ah guddoonsiiyay howlwadeennadii Wasaaradda, hay'addaha amniga gudaha, Shirkadda Aleel Communications iyo shaqsiyaadkii sida gaarka ah uga qaybqaatay qabanqaabada iyo hirgelinta Shirweynaha.



Wasiirka Amniga Gudaha oo la kulmay Safiirka Jarmalka ee Soomaaliya



Muqdisho, 23 Sebtembar 2026: Wasiirka Amniga Gudaha ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, Mudane Cabdullaahi Sheekh Ismaaciil (Fartaag), ayaa kulan la yeeshay Safiirka Jamhuuriyadda Federaalka Jarmalka u fadhiya Soomaaliya, Mudane Sebastian Groth.

Kulanka ayaa looga hadlay xaaladda amniga dalka, xoojinta iskaashiga dhinacyada amniga iyo socdaalka, la-dagaallanka burcad-badeednimada iyo dambiyada xuduudaha ka gudba.

Safiirka Jarmalka ayaa bogaadiyey wada-shaqeynta Dowladda Federaalka Soomaaliya, gaar ahaan tan kala dhexeysa Wasaaradda Amniga Gudaha iyo Hay'adda Socdaalka iyo Jinsiyadda, isagoo adkeeyey muhiimadda iskaashiga labada dhinac ee dhinacyada amniga, socdaalka iyo xuduudaha.

Labada dhinac ayaa sidoo kale ka wada hadlay qorshayaasha la xiriira bixitaanka AUSSOM iyo muhiimadda ay leedahay in Soomaaliya si buuxda ula wareegto mas'uuliyadda amniga dalka, iyadoo la xoojinayo awoodda hay'adaha amniga iyo taageerada saaxiibbada caalamiga ah.



Wasiirka Amniga Gudaha oo ka qaybgalay xafladda 77-guurada Aasaaska Shiinaha



Muqdisho, 21 Sebtembar 2026: Wasiirka Amniga Gudaha ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, Mudane Cabdullaahi Sheekh Ismaaciil (Fartaag), ayaa ka qaybgalay munaasabad ay Safaaradda Jamhuuriyadda Shacabka Shiinaha ku qabatay Muqdisho, taas oo lagu xusayay 77-guurada Aasaaska Jamhuuriyadda Shacabka Shiinaha.

Munaasabadda waxaa ka qaybgalay mas'uuliyiin ka tirsan Dowladda Federaalka Soomaaliya, diblomaasiyiin iyo wakiillo ka socday hay'adaha caalamiga ah.

Munaasabadda ayaa lagu xusay xiriirka diblomaasiyadeed iyo iskaashiga ka dhexeeya Soomaaliya iyo Shiinaha, oo ku dhisan xiriir soo jireen ah iyo danaha labada dal.

Wasaaradda Amniga Gudaha oo soo bandhigtay waxqabad muuqda



Muqdisho, 13 Sebtembar 2026: Wasaaradda Amniga Gudaha ayaa si wanaagsan uga qaybqaadatay qiimeynta waxqabadka Wasaaradaha Xukuumadda DanQaran, oo uu hoggaaminayay Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, Mudane Xamsa Cabdi Barre.

Qiimeyntu waxay cabbirtay heerka fulinta ballanqaadyadii iyo qorshayaashii ay Wasiirradu la saxiixdeen Ra'iisul Wasaaraha, iyadoo la adeegsanayo hannaan dijitaal ah oo daahfuran, kaas oo si cad u muujinaya natiijooyinka Wasaarad kasta.

Waxqabadka Wasaaradda Amniga Gudaha wuxuu ka tarjumayaa dadaallada lagu xoojinayo amniga, lagu tayeynayo hay'adaha, la iskugu-duwayo hawlaha amniga, laguna horumarinayo adeegyada amni ee shacabka Soomaaliyeed.

Natiijadani waxay ku timid hoggaan leh jihayn cad, isla-xisaabtan joogto ah iyo wada-shaqeyn xooggan oo dhexmartay Wasaaradda iyo hay'adaha hoos yimaada.

Wasaaraddu waxaa ka go'an in waxqabadka la gaaray loo beddelo saameyn waarta oo shacabka ku dareemaan amni, xasillooni iyo kalsooni hay'adeed, iyadoo la dardargelinayo hirgelinta mudnaanta amniga qaranka iyo qorshayaasha Xukuumadda DanQaran.



Wasiirka Amniga Gudaha oo booqday xarumaha Booliiska iyo warshado ku yaalla Xuzhou



Xuzhou, Shiinaha, 12 Sebtembar 2026: Wasiirka Amniga Gudaha ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, Mudane Cabdullaahi Sheekh Ismaaciil (Fartaag), iyo wafdiga uu hoggaaminayo oo booqasho rasmi ah ku joogay Shiinaha, ayaa booqday xarumaha Booliiska iyo warshado ku yaalla magaalada Xuzhou ee Gobolka Jiangsu.

Wafdiga ayaa booqday Saldhigga Booliiska Caasimadda Xuzhou, halkaas oo lagu soo bandhigay hababka Booliisku u maareeyo amniga iyo adeegyada shacabka, iyo doorka tiknoolajiyadda ee hawlaha Booliiska.

Wafdiga ayaa sidoo kale booqday warshado iyo xarumo bandhig oo soo saara gaadiid iyo tiknoolajiyad loo adeegsado adeegyada amniga, halkaas oo lagu soo bandhigay habka wax-soo-saarka iyo adeegsiga tiknoolajiyadda.

Booqashada ayaa fursad u siisay wafdiga Soomaaliya inay qiimeeyaan khibradaha iyo nidaamyada casriga ah ee Booliiska Xuzhou, gaar ahaan adeegsiga tiknoolajiyadda, maamulka amniga iyo adeegga shacabka.

Dardargelinta qorshaha iyo waxqabadka Wasaaradda Amniga Gudaha



Muqdisho, 12 Sebtembar 2026: Ku-simaha Agaasimaha Guud, Mudane Cabdullaahi Faarax, ayaa guddoomiyay kulan ay isugu yimaadeen Agaasimayaasha Waaxyaha iyo La-taliyeyaasha Wasaaradda.

Kulanka waxaa diiradda lagu saaray hirgelinta natiiyooyinkii Shirweynihii Qaran ee Maamulka iyo Isku-duwidda Amniga Gudaha ee 1-2 Sebtembar 2026, iyo qiimeynta waxqabadka sanadlaha ah ee Wasaaradda iyo hay'adaha hoos yimaada.

Waxaa sidoo kale la isla eegay hawlaha la qabtay, kuwa socda iyo caqabadaha hortaagan kuwa aan weli qabsomin, iyadoo la adkeeyay in la dardargeliyo hawlaha mudnaanta u leh Wasaaradda.



Ku-simaha Wasiirka Wasaaradda Amniga Gudaha, ahna Wasiiru-dowlaha Wasaaradda oo ka qaybgalay Munaasabadda daahfurka Siyaasadda ilaalinta badqabka Rayidka



Muqdisho, 11 Sebtembar 2026: Ku-simaha Wasiirka Wasaaradda Amniga Gudaha, ahna Wasiiru-dowlaha Wasaaradda Xil. Maxamed Cali Xagaa ayaa qayb ka ahaa Munaasabadda daahfurka Siyaasadda ilaalinta badqabka Rayidka xilliyada hawlgalada ciidan iyo colaadaha hubeysan asagoo Khudbad wax ku ool ah ka jeediyay Daahfurka Siyaasadan.

Madasha Daahfurka waxaa ka soo qaybgalay hay'adaha hoggaaminta iyo kormeerka dhaqangalka Siyaasadan sida Wasaaradda Gaashaandhiga, Wasaaradda Amniga Gudaha, Wasaaradda Cadaalada iyo Wasaaradda Arrimaha Gudaha. Sidoo kale Lataliyaha Amniga Qaranka, Wasaaradda Amniga Gudaha ee Dowlad-goboleedyada, hay'adaha kale ee dowladda Federaalka, bulshada rayidka iyo Wakiilada beesha caalamka.

Ku-simaha Wasiirka ayaa xusay in Wasaaradda Amniga ay muhiimad gaar ah siineyso ilaalinta badqabka dadka rayidka ah isla markaana ciidamada hay'adaha Amniga loo tababaro inay taxadar muujinyaan xilliyada hawlgalada ayagoo garab ku siinaya dadka rayidka inay si nabad ah u helaan adeegyada kala duwan ee aas'aasiga ah.

Wasaaradda Amniga waxa ay ka mid tahay Wasaaradaha ka qayb qaatay diyaarinta Siyaasadan isla markaana hirgelinaya. Ugu dambeyn, Wasiirka ayaa tibaaxay ahmiyada ay leedahay iskaashiga iyo wada-shaqeynta Wasaaradaha safka hore ee siyaasadan qaybta ka ah, asagoo ugu baaqay dhamaan ka qaybgalayaasha inay gacan ka geystaan dhaqangelinta Siyaasadan Qaran.



Wasiirka Amniga Gudaha oo la kulmay Wasiir Ku-xigeenka Amniga Dadweynaha ee Shiinaha



Lianyungang, Shiinaha, 10 Sebtembar 2026: Wasiirka Amniga Gudaha ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, Mudane Cabdullaahi Sheekh Ismaaciil (Fartaag) ayaa kulan la qaatay Wasiir Ku-xigeenka Wasaaradda Amniga Dadweynaha ee Shiinaha, Mudane Lv Wuqin.

Kulanka ayaa ujeeddadiisu ahayd xoojinta xiriirka iyo iskaashiga amni ee Soomaaliya iyo Shiinaha, gaar ahaan dhinacyada la xiriira is-weydaarsiga khibradaha, tababarrada, horumarinta awoodda hay'adaha amniga iyo wadaagista aqoonta ku saabsan ka hortagga dambiyada iyo ilaalinta amniga dadweynaha.

Labada dhinac ayaa sidoo kale ka wada hadlay sidii loo sii horumarin lahaa iskaashiga labada wasaaradood, iyadoo la xoojinayo xiriirka hay'adaha amniga, korna loo qaadayo wada-shaqeynta ku saleysan danaha labada dal.

Wasiir Fartaag ayaa magaalada Lianyungang uga qaybgalaya Madasha Caalamiga ah ee Iskaashiga Amniga Dadweynaha 2026 (GPSCFL), oo ay ka qaybgalayaan masuuliyiin iyo khabaro ka kala socota dalal badan.

Ka-qaybgalka Soomaaliya ee madashan ayaa muhiim u ah in dalka uu la wadaago aragtidiisa ku aaddan amniga, isla markaana uu ka faa'iideysto khibradaha iyo xalalka ay dalalka kale ka sameeyeen la tacaalidda caqabadaha amni. Madashu waxay sidoo kale fursad u tahay in la xoojiyo xiriirrada caalamiga ah, la ballaariyo iskaashiga amni, lana helo fursado cusub oo lagu horumarin karo awoodda hay'adaha amniga Soomaaliya.

Wasiirka Amniga Gudaha oo Soomaaliya ku metelaya Wadahadallada Amniga ee Lianyungang



Lianyungang, Shiinaha, 10 Sebtembar 2026: Wasiirka Amniga Gudaha ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, Mudane Cabdullaahi Sheekh Ismaaciil (Fartaag) ayaa ka qaybgalay Wadahadallada Saddexaad ee Wasiirrada Bariga Afrika ee Fulinta Sharciga iyo Iskaashiga Amniga, kuwaas oo lagu qabtay magaalada Lianyungang ee gobolka Jiangsu, Shiinaha.

Wasiirku wuxuu soo bandhigay mudnaanta Soomaaliya ee xoojinta hay'adaha amniga iyo la-dagaallanka argagaxisada, dambiyada abaabulan iyo dambiyada maaliyadeed. Waxa uu sidoo kale adkeeyay muhiimadda

ay leedahay in Soomaaliya, dalalka Bariga Afrika iyo Shiinuhu yeeshaan iskaashi amni oo wax-ku-ool ah. Wasiirku wuxuu uga mahadceliyay Shiinaha taageerada uu siiyo Soomaaliya, isaga oo ku boorriyay in la sii xoojiyo iskaashiga labada dal ee dhinacyada amniga iyo fulinta sharciga.



Wasiirka Amniga Gudaha Soomaaliya oo ka qaybgalay shir caalami ah oo ka dhacay Lianyangang



Lianyangang, Shiinaha, 10 Sebtembar 2026: Wasiirka Amniga Gudaha ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, Mudane Cabdullaahi Sheekh Ismaaciil (Fartaag) iyo wafdi uu hoggaaminayo ayaa ka qaybgalay furitaanka shirkii ugu horreeyay ee Isbahaysiga Caalamiga ah ee La-dagaallanka Dambiyada Internetka iyo Isgaarsiinta, kaas oo lagu qabtay magaalada Lianyangang ee dalka Shiinaha.

Shirka ayaa looga hadlay xoojinta iskaashiga caalamiga ah ee lagula dagaallamayo dambiyada la xiriira internetka iyo isgaarsiinta, iyadoo xoogga la saaray sidii hay'adaha fulinta sharciga ee dowladuhu si wadajir ah uga hortagi lahaayeen dambiyadaas.

Isbahaysiga Caalamiga ah ee La-dagaallanka Dambiyada Internetka iyo Isgaarsiinta wuxuu ujeedkiisu yahay inuu fududeeyo is-weydaarsiga xogta iyo sirdoonka, iskaashiga baaritaannada, is-dhaafsigu caddeymaha, iyo qabashada iyo soo-celinta hantida ka dhalata dambiyada.

Sidoo kale, Isbahaysigu wuxuu taageeri doonaa tababarrada hay'adaha fulinta sharciga, wuxuuna qabanqaabin doonaa ololeyaal wacyigelin ah, soo saari doonaa digniino ku saabsan dambiyada internetka iyo isgaarsiinta, isla markaana diyaarin doonaa warbixinno ku saabsan isbeddellada iyo horumarka dambiyada noocan ah.



Wasiirka Amniga Gudaha oo ka qaybgalay Madasha Caalamiga ah ee Iskaashiga Amniga Dadweynaha ee Lianyungang

The 2026 Conference of Global Public Security Cooperation

中国·江苏·连云港 Lianyungang, Jiangsu
2026.09 September 2026




Lianyungang, Shiinaha, 9 Sebtembar 2026: Wasiirka Amniga Gudaha ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, Mudane Cabdullaahi Sheekh Ismaaciil (Fartaag), ayaa ka qaybgalay furitaanka Madasha Caalamiga ah ee Iskaashiga Amniga Dadweynaha 2026, oo lagu qabtay magaalada Lianyungang ee dalka Shiinaha.

Madasha oo ay ka qaybgalayaan in ka badan 2,100 qof oo ka kala socda 139 dal, gobol iyo hay'ado caalami ah, ayaa diiradda lagu saarayaa xoojinta iskaashiga amniga iyo sidii si wadajir ah looga jawaabi lahaa khataraha amni ee xuduudaha ka gudba.

Ajandaha madasha waxaa ka mid ah la-dagaallanka argagaxisada iyo dambiyada abaabulan, dambiyada internetka, mukhaadaraadka, amniga socdaalka iyo adeegsiga tiknoolajiyada casriga ah ee amniga.

Ka qaybgalka Soomaaliya wuxuu xoojinayaa dadaallada lagu ballaarinayo iskaashiga caalamiga ah, is-dhaafsigu khibradaha iyo horumarinta hababka casriga ah ee looga hortago dambiyada abaabulan iyo khataraha amni ee xuduudaha ka gudba.

Wasiirka Amniga Gudaha oo booqday Carwo lagu soo bandhigay Tiknoolajiyadda Casriga ah ee Amniga



Lianyungang, Shiinaha, 9 Sebtembar 2026: Wasiirka Amniga Gudaha, Mudane Cabdullaahi Sheekh Ismaaciil (Fartaag), ayaa booqday carwo caalami ah oo lagu soo bandhigay tiknoolajiyado cusub oo taageeraya amniga shacabka, ilaalinta xuduudaha iyo maaraynta xaaladaha degdegga ah.

Carwada ayaa lagu soo bandhigay xalal ku saleysan Garaadka Macmalka ah (AI), isgaarsiinta casriga ah iyo nidaamyada amniga, iyadoo ay ka qaybgaleen shirkado caalami ah oo ay ka mid tahay Huawei.

Wasiir Fartaag ayaa ka dhageystay khubarada warbixinno ku saabsan adeegsiga tiknoolajiyadaha cusub iyo doorkooda ku aaddan xoojinta awoodda hay'adaha amniga iyo badbaadada shacabka.

Booqashadu waxay qayb ka tahay muhiimadda ay Dowladda Soomaaliya siinayso hal-abuurka iyo tiknoolajiyadda casriga ah ee taageeraya horumarinta adeegyada amniga iyo awoodda hay'adaha dalka.



Wasiirka Amniga Gudaha oo booqday Safaaradda Soomaaliya ee Beijing



Beijing, Shiinaha, 6 Sebtembar 2026: Wasiirka Amniga Gudaha ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, Mudane Cabdullaahi Sheekh Ismaaciil (Fartaag) iyo wafdi uu hoggaaminayo ayaa booqday Safaaradda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya ee Beijing, xilli uu dalka Shiinaha uga qaybgalayo Shirweyne Amni oo diiradda lagu saarayo iskaashiga dalalka Koonfurta Adduunka (South-South Collaboration).

Wafdiga waxaa Safaaradda ku soo dhaweeyay La-taliyaha Koowaad, Mudane Cabdisalaam Suleymaan, oo Wasiirka iyo wafdigiisa la wadaagay warbixin ku saabsan howlaha Safaaradda, xiriirka Soomaaliya iyo Shiinaha, iyo dadaallada diblomaasiyadeed ee lagu horumarinayo danaha qaranka.

Booqashadu waxay muujinaysaa muhiimadda isku-xirka hay'adaha dowladda iyo isku-duwidda dadaallada diblomaasiyadeed iyo kuwa amni, iyadoo Soomaaliya ay sii xoojinayso xiriirkeeda iyo iskaashigeeda istiraatiijiga ah ee ay la leedahay Shiinaha iyo dalalka kale ee Koonfurta Adduunka.



Shirweynaha Qaran ee Maamulka iyo Isku-duwidda Amniga Gudaha oo lagu soo gabagabeeyay Muqdisho



Muqdisho, 2 Sebtembar 2026: Wasaaradda Amniga Gudaha ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya ayaa maanta magaalada Muqdisho ku soo gabagabeysay Shirweynaha Qaran ee Maamulka iyo Isku-duwidda Amniga Gudaha, oo 1-2 Sebtembar 2026 lagu qabtay teendhada Afisyooni ee Garoonka Diyaaradaha ee Muqdisho, iyadoo halkudhiggiisu ahaa “Xoojinta Maamulka qaybaha Amniga Gudaha.” Shirweynuhu wuxuu diiradda saaray xoojinta maamulka iyo korjoogteynta hay’adaha amniga gudaha, sii xoojinta isku-duwidda hay’adaha amniga, iyo dhisidda hay’ado amni oo la awoodi karo bixinta kharashaadkooda.

Shirweynaha qaybtiisa furitaanka waxaa khudbad ka jeediyay Wasiirka Amniga Gudaha, Mudane Cabdullaahi Sheekh Ismaaciil (Fartaag), waxaana si rasmi ah u furay Guddoomiyaha Golaha Shacabka ahna Ku-simaha Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, Mudane Cabdulqaadir Maxamed Nuur (Jaamac). Shirweynuhu wuxuu isu keenay hay’adaha amniga ee heer federaal iyo heer dowlad-goboleed, Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, iyo wasaaradaha muhiimka ah ee dowladda, oo ay ka mid yihiin Wasaaradaha Arrimaha Gudaha, Difaaca, iyo Awqaafta iyo Arrimaha Diinta, iyo bah-wadaagta caalamiga ah oo ay ka mid yihiin Hawlgalka KMG ah ee Qaramada Midoobay ee Soomaaliya (UNTMIS) iyo Hawlgalka Midowga Afrika ee Taageerada iyo Xasilinta Soomaaliya (AUSSOM), iyo sidoo kale safiir, khabaro amni iyo daneeyayaal kale.

Labadii maalmood ee Shirweynaha, ka-qaybgalayaashu waxay ka qaybqaateen saddex kulan oo farsamo:

Kulanka Farsamo ee 1aad — Korjoogteynta Hay’adaha Amniga Gudaha. Ka-qaybgalayaashu waxay falanqeeyeen doorka Wasaaradda ee korjoogteynta Ciidanka Booliska Soomaaliyeed (SPF), Hay’adda Sirdoonka iyo Nabad-sugidda Qaranka (NISA), iyo Hay’adda Socdaalka iyo Jinsiyadda (ICA). Waxaa sidoo kale looga hadlay habka warbixinnada loo gudbiyo, isla-xisaabtanka iyo dabagalka waxqabadka, iyo sida la isku waafajin karo madaxbannaanida hawlgallada iyo korjoogteynta ay sameeyaan Wasaaradda iyo Baarlamaanka.



Kulanka Farsamo ee 2aad — Isku-duwidda Hay'adaha iyo Wasaaradaha. Kulankan waxaa looga hadlay caqabadaha isku-duwidda ee Wasaaradda iyo hay'adaha hoos yimaada iyo qaab-dhismeedka guud ee amniga dalka. Waxaa si gaar ah diiradda loo saaray isku-duwidda Dowladda Federaalka iyo Dowlad-goboleedyada ee amniga gudaha, hababka isku-duwidda, kala caddeynta waajibaadka hay'adaha, iyo wadaagga xogta iyo sirdoonka.

Kulanka Farsamo ee 3aad — Dib-u-habaynta laamaha Amniga iyo daboolidda bixinta kharashaadkooda. Ka-qaybgalayaashu waxay diiradda saareen dhisidda hay'ado amni oo la dabooli karo kharashkooda islamarkaana muddo dheer jiri kara, sida tirada ciidamada, in la kordhiyo kharashaadka ku baxa amniga ee hadda jira, xaqiijinta maalgelin dhaqaale oo waarta, iyo yareynta ku-tiirsanaanta taageerada deeq-bixiyeyaasha si waafaqsan Qaab-dhismeedka Amniga Qaranka (NSArch) iyo Qorshaha Horumarinta Hay'adaha Amniga (SSDP), iyadoo sidoo kale lagu salaynayo xaaladda kala-guurka hawlgalka AUSSOM.

Tallaabooyinka Xiga

Shirweynahani wuxuu astaan muhiim ah u yahay horumarka hay'adaha amniga Soomaaliya, isagoo ah shirweynihii ugu horreeyay ee si gaar ah loogu qabto amniga gudaha. Natiijooyinka kasoo baxay Shirweynuhu waxay muujinayaan sida ay hay'adaha amniga Soomaaliya uga go'an tahay xoojinta amniga gudaha ee dalka.

Si kastaba ha ahaatee, shaqadu kuma eka labadaan maalmood ee Shirweynaha; waxay hadda u gudbaysaa marxalad cusub, iyadoo la qaadayo tallaabooyin iyo hindisayaal gaar ah oo lagu doonayo in ballanqaadyadii iyo talooyinkii kasoo baxay Shirweynaha loo beddelo horumar la taaban karo oo waara oo laga sameeyo amniga gudaha Soomaaliya.

Intii uu Shirweynuhu socday, Wasaaradda Amniga Gudaha waxay muujisay inay diyaar u tahay inay hoggaamiso geeddi-socodkan. Ka qaybgalka hay'adaha iyo laamaha amniga Soomaaliya wuxuu sidoo kale muujiyay go'aan wadajir ah oo lagu doonayo in talooyinka kulamada loo beddelo tallaabooyin cad oo la fulin karo, si loo xoojiyo isla-xisaabtanka, isku-duwidda iyo awoodda hay'adaha ee guud ahaan laamaha amniga. Wadajirka iyo iskaashiga ka dhex muuqday Shirweynaha ayaa laf-dhabar u noqonaya dadaallada lagu xoojinayo hay'adaha amniga gudaha Soomaaliya, lana gaarsiinayo dhammaan shacabka Soomaaliyeed mustaqbal amni ahaan kan hadda ka wanaagsan, kana xasilloon.

Wasaaradda Amniga Gudaha waxay si kal iyo laab ah ugu mahadcelineysaa dhammaan hay'adaha Dowladda Federaalka iyo Dowlad-goboleedyada, Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, bah-wadaagta caalamiga ah, khubarada, iyo daneeyayaasha ka qaybgalay Shirweynaha, kuwaas oo ka qayb qaatay xoojinta maamulka iyo isku-duwidda amniga gudaha Soomaaliya.





info@mois.gov.so
www.mois.gov.so



Via Tanzania 888 Building,
Mogadishu, Somalia



MoisJFS



mois_fgs